SOMALI

# WARQADDA WARBIXINTA TALAALKA KA HOR TAGGA KOROONAHA

**FEYRASKA KOROONAHA**
Feyraska koroonaha (SARS-CoV-2) waxaa is qaadsiiya dadka oo isu gudbiya waxa uuna sababaa ama keenaa cudurka koroonaha oo loo soo gaabiyo COVID-19. Cudurkaan koroonuhu waxa uu ku dhacaa dadka oo dhan da` kasta oo ay yihiin. Cudurku marka uu qofka haleelo waxa uu hayn karaa maalmo ama todobaadyo waxaana la socda calaamado ay ka mid yihiin qandho, qunfac, dareenka dhedheka iyo urka oo la waayo iyo neefsashada oo cariiri gasha. Haddii cudurkaan xaaladiisu xumaato waxa uu fasas ama caabuq ku dhalinayaa neef mareenka iyo xubno kale. Markaas waxaa lagama maarmaan noqonaysa in qofka isbitaal loo qaado oo qaybta dadka xaaladaha daran la geeyo si xaaladiisa loola socdo. Cudurka koroonuhu waxa uu sababi karaa dhibaato caafimaad darro ah oo muddo la soconaysa qofka uu ku dhacay ama ugu danbayn sababi karta in loo dhinto.

**MAXAY U HABBOON TAHAY IN AAD IS TALAASHO?**
Talaalku waxa uu kaa dhowrayaa in haddii cudurka koroonuhu kugu dhaco uu kugu xumaado oo uu halis ku gaarsiiyo.

**SIDEE AYUU TALAALKU U SAAMAYNAYAA AMA ULA FALGELAYAA JIRKA?**
Talaalku waxa uu kicinayaa jirkaaga si uu kor ugu qaado difaaca jirka kadibna jirku cudurkaas difaac uga galo. Waxaa jirkaaga ku samaysmaaya maado liddi ku ah cudurkaas oo suurta gelinaysa ama kaa dhowraysa in haddii cudurku kugu dhaco uu kugu xumaado. Taas macneheedu waxa ay tahay haddii cudurku kugu dhaco talaalna aad qabtay talaalkaasu waxa uu dhowris kuu yahay muddo lix bilood ah in aan cudurku kugu xumaan oo uusan halis ku gelin. In qof talaal qaba cudurku haleelase waa arrin naadir ah oo aan badanaaba dhicin haddii ay dhacdana cudurku ma gaaraayo heer uu kugu xumaado. Sidaa darteed waa in laga fogaadaa in cudurku uu xaalad xun ku gaarsiiyo amaba sababa in loo dhinto. Maadada la isku talaalaayo waxa ay ka kooban tahay feyraska koroonuhu kuma jiro oo qayb kama aha . Sidaa darteed ma aha wax suurtagal ah in talaalka koroonaha ee aad qaadatay uu kugu rido cudurkii koroonaha.

**WAXTARKA TALAALKA MA LA HUBAA?**
Haa. Maadada talaalku ka samaysan yahay waa la baaray waana la hubiyay waxtarkeedu in uu fiican yahay . Maadooyinka uu ka samaysan yahay talaalada looga hortago koroonaha oo loo ogol yahay in yurub gudaheeda lagu isticmaalo waxaa loo baaray si waafi ah si joogta ah ayaana looga waqrqabaa oo loo ilaaliyaa. Hey`adda daawada ee yurub (EMA) ayaana ruqsa siisa maadada talaal ee la ogol yahay.

**WAA KUMA QOFKA LA TALAALI KARO**?
Talaalada iyo qaabkoodu waxa ay u kala duwan yihiin sida maadada talaalku ka samaysan yahayba ay u kala duwan tahay . Waxaana talaal qaadan kara caruurta da`doodu 12 jir ka wayn tahay ama dadka qaangaarka ah oo 18 sano ka wayn. Waxaa kale oo talaalka qaadan kara oo la talaali karaa dadka cudurada hore u qabay sida (sokorta, dhiigkarka, wadna xanuunka iyo neefta ). Waxa ay awoodaan oo laga rabaa in ay dhakhtarka/dhakhtarada daawaynaya/sa ay kala hadlaan talaalka iyo xaaladiisa ka dibna go`aan ka gaaraan in la talaalo iyo in kale .

Sidoo kale dadka xasaasiyada (alerjiyada) qaba talaalka way qaadan karaan xasaasiyadaasu ha ahaato mid cuntada laga qabo ama ubaxa ama busta (boorka) amase u adkaysasho la`aan daawada qalajisada ahba ahaatee. Sababta oo ah maadooyinkaanu kama mid aha waxa ay maadada talaalku ka samaysan tahay . Xasaasiyo haddii aad qabto fadlan u sheeg dhakhtarkaaga /dhakhtaradaada marka aad wadahadalka laguugu sharaxaayo talaalka iyo saamayntiisa la yeelanayso soona qaado cadaymaha aad u hayso in aad xasaasiyo qabto.

**WAA KUMA QOFKA AAN LA TALAALI KARIN?**
Haddii ay qandho daran ku hayso (heerkulka jirkaaguna 38 C) ka badan koreeyo u sheeg fadlan dhakhtarka /dhakhtarada inta aan lagu talaalin. Haddii aad uur leedahay ama aad rumaysan tahay in aad uur qaaday ama aad qorsheyneyso in aad uur qaado u sheeg oo la hadal dhakhtarka/dhakhtarada ku daaweynaya/daaweynaysa.

Haddii koroonuhu uu hadda ku haayo talaal ma qaadan kartid .Waxa aad talaal qaadan kartaa marka afar todobaad ka soo wareegto markii lagaa helay cudurka koroonaha .

**MA HABBOON TAHAY IN LA TALAALO QOFKII UU KOROONUHU HOREY UGU DHACAY?**
Markii koroonuhu kugu dhacay ka dib waa lagu qaadsiin karaa mar kale. Sidaa darteed waxaa habboon in dadka uu ku dhacay koroonuhu ay is talaalaan. Laakiin talaalku waa in uu noqdaa marka afar todobaad ka soo wareegto markii uu kugu dhacay.

**XAGGEE AYAAN ISKA TALAALI KARAA SIDEE AYAANSE ISU TALAALI KARAA?**
Talaalada meelo kala duwan ayaa laga bixiyaa waxa aad awoodaa in aad ballan qabsato ama ballan la`aan aad tagto meelaha talaalada laga bixiyo. Meelaha talaalada laga bixiyo iyo waqtiga ay furan yihiin waxa aad ka heli kartaa. Impfservice.wien

**SIDEE AYAA TALAALKU U SOCONAYAA?**
Talaalku qasab maaha oo qofku isaga ayaa go`aan ka gaaraaya in uu qaadanaayo iyo in kale. Talaalku waa lacag la`aan oo qofka is talaalaaya wax lacag ah laga qaadi maayo. Talaalka ka hor waxaa laguu dhiibayaa warqad su`aalo ku qoran yihiin su`aalahaas waa in aad ka jawaabtaa oo aad foomkaas soo buuxisaa. Haddii wax su`aal ah oo talaalka ku saabsan aad qabto waxa aad awoodaa intii aan lagu talaalin in aad dhakhtarka/dhakhtarada waydiisaa oo aad ka wada hadashaan . Fadlan markii aad talaal u imaanayso hore u soo qaado aqoonsi sawirkaagu ku dhegan yahay sida baasaboor ama aqoonsi sharciyeed kale. Waxaa kale oo aad soo qaadataa kaarka caymiska caafimaadka( e-card) iyo buugga talaalka haddii aad haysato.Caruurta 14 sano ka yar waa in uu la socdaa qofka mas`uulka ka ah (sida waalidka ) ama qofkaa mas`uulka caruurta ka ah qof uu si rasmi ah u wakiishay. Marka qofka la talaalaayo waxaa cirbadda maadada la isku talaalaayo ku jirto looga mudayaa garabka. Marka qofka la talaalo waxaa waajib ku ah in uu muddo 20 daqiiqo ah uu meesha lagu talaalay joogo oo uusan bixin. Haddii marka lagu talaalo kadib xaalkaagu xumaado u sheeg fadlan dhakhtarka/dhakhtarada ama shaqaalaha caafimaad ee meesha jooga. Waxaa jira maadooyin talaal oo kala duwan iyada oo ay ku xiran tahay nooca talaalka waxaa lagu siin doonaa labo talaal (midka hore iyo midka danbe). Waqtigaan hadda la joogana talaal labaad oo xoojin u ah kii hore waxaa la isi siiyaa todobaabyo kooban ka dib markii kii hore aad qaadatay.

**MA DOORAN KARAA NOOCA MAADADA TALAALKA EE AAN QAADANAAYO?**
Iyada oo da`da aad jirto iyo maadada talaal ee meesha taalla oo suurta galka ah in lagu siiyo la eegaayo waad dooran kartaa nooca maadada talaalka ee aad rabto.

**TALAALKA KOROONUHU MA LEEYAHAY OO MA DHALIN KARAA SAAMAYN MIDDII LAGU TALO GALAY AAN AHAYN?**
Talaalku waxa uu sababi karaa saamayn tii lagu talo galay aan ahayn oo la dhibsado si sahlan oo wanaagsan ayaase saamayntaas loola tacaali karaa oo loo daawayn karaa. Waxaa kale oo soo raaca xanuun, barar ama in ay guduudato oo ay casaato meesha la talaalay. Sida badan dadku talaalka ka dib waxa ay dareemayaan daal ama waxaa ku dhacaaya tusaale ahaan madax xanuun ama qandho qafiif ah . Sidaas oo kale lalabo (yalaalugo) mantag ama jarays way imaan karaan. Laakiin saamayntaas jirka ku dhacaysa waa ka falcelin talaal oo caadi ah sababta oo ah jirka ayaa waxaa loo diyaarinaayaa in uu ka hor tago waxa cudurka keena . Sida badan saamayntaasu waa ay tegeysaa maalmo ka dib . tobankii qof ee la talaalana in ka badan hal qof ayaa saamayntaasu haleeshaa.

**WAAJIB MIYEY IGU TAHAY IN AAN ANIGA OO TALAAL QAATAY HADANA AAN MASKARO FFP2 XIRTO?**
Adiga oo talaal qaatay waxaa hadana waajib kugu ah in aad waxa bulshada nabad gelyadeeda ah aad fuliso sida afka iyo sanka in aad daboolato maskaro FFP2 aad xirato kala fogaanshaha in aad ilaaliso iyo in aad nadaafadda ku dadaasho.

**WARBIXINNO INTAAS KA DHEERI AH WAXA AAD KA HELEYSAA**
https://www.sozialministerium.at/Corona-Schutzimpfung/Corona-Schutzimpfung---Haeufig-gestellte-Fragen.html
https://www.sozialministerium.at/Informationen-zum-Coronavirus/Coronavirus---Aktuelle-Informationen-in-Fremdsprachen-.html
https://www.sozialministerium.at/Corona-Schutzimpfung/Corona-Schutzimpfung---Jetzt-anmelden-/Faktencheck-zur-Corona-Schutzimpfung.html